# Qoriga Qabiilka iyo Qaaca Qabyaaladda

W/Q Cabdisaciid Cabdi Ismaaciil

March 08, 2015

---

Arrimaha carqaladda ku ah nabadda iyo nolosha bulshada Soomaaliyeed kuwooda ugu waaweyn waxaa ka mid ah qabyaaladda iyo xagjirnimada. Labadaas cudur oo aan xal loo helinna, suurogal noqon mayso in dadnimo iyo dowladnimo toona la haweysto.

Wadaad reer Maka ahaa ayaa wuxuu ku doodi jirey in wadaaddada Sacuudigu marka ay dadka wacdinayaan, aysan dhab ahaan ujeeddadoodu ahayn in ay dadka gudaha wax u sheegaan, balse wacdigooda iyo waxsheeggoodu uu ku socdo muslimiinta ku nool dalka dibeddiisa. In arrinku sidaa yahayna, wuxuu marag uga dhigan jirey erayada wadaaddadaasi ay wacdigooda ku soo gunaanadaan. Wadaaddadaasi waxay dadka uga digaan wax Islaamku faray oo muslimiintu ka tageen ama wax Islaamku reebay oo muslimiintu ay ku aqdaantaan, waxayna ku nuuxnuuxsadaan khatarta iyo dhibaatada if iyo aakhiraba leh ee arrinkaas ka dhalanaysa.



Hase ahaatee, aalaaba wadaaddadaasi waxay wacdigooda ku soo gunaanadaan in ay yiraahdaan: Alle mahaddi, haddaan Sacuudi nahay arrinkaasi nama haysto, taana waxaa ugu wacan xukuumaddayada barakaysan ee shareecada Islaamka ku dhaqanta. Weedhaas oo nuxurkeedu noqonayo in wacdigii wadaadku waqtiga badan dadka uga dhumiyey uusan ahayn mid khuseeya dadkii loo jeedinayey, ee uu yahay mid ku socda duul badaha gadaashooda ku nool.

Doodda wadaadkaas reer Maka waxaan xasuustaa mar walba oo aan maqlo wadaad Soomaaliyeed oo ka hadlaya mawduuca qabyaaladda. Wadaaddadu iyaga oo ku mahadsan marar badan waxay isku dayaan in ay bulshada uga digaan xumaha qabyaaladda, balse mar kasta oo ay qabyaaladda ka hadlaan waxay sidoo kale soo qaataan qabiilka oo ay ku sheegaan in uusan dhib lahayn, oo Alleba uu quraanka noogu sheegay inuu dadka ka dhigay shucuub iyo qabiilooyin si ay isu aqoonsadaan darteed [Suurat al-Xujuraat, aayadda 13-aad). Weliba wadaadda qaarkood intaa kuma gaabsadaane waxay ku doodaan in barashada abtirsigu uu yahay wax wanaagsan oo diintu na fartay, uuna ka qayb qaato xiriirinta qaraabada iyo in aan kala ogaanno dumarka guurkooda naloo xalaaleeyey iyo kuwa nalaga xarrimay.

Waa dhab in quraanku sidaa noosheegay, laakiin waxaa habboon in maanka lagu hayo miraha ka dhalanaya marka ruux Soomaali ah oo aqoontiisu aad u kooban tahay, qabyaaladina ludda ka


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

gashay loo sheego in waxa xun ee diintu naga reebtay ay tahay qabyaaladda, laakiin qabiilku uusan dhib lahayn. Waxay ila tahay in miraha wacdiga noocaas ah ka dhashaa aysan dhaafsiisnaanayn in qabyaaladdii sii xoogaysto, oo jeermiskii sii helo deegaan ku habboon inuu ku bulaalo. Natiijada wacdiguna isugu biyo shubanayso in dhegaystayaashu isku qanciyaan in qabiilku yahay wax diintu oggoshahay sidaa darteedna loo baahan yahay in ay kabtooda iyo tolkoodba dhexda uga jiraan, dhib iyo dheefna la wadaagaan.

Qabiilka iyo qabyaaladdu waa sidii qori dab ah iyo qaaciis. Shakina kuma jiro in inta qabiil jiro qabyaaladi jireyso, sidoo kalena inta abtirsiinyo jirto aysan muwaadinnimadu (= citizenship) bulshada macne badan u samaynayn.

Islaamku wuxuu ku guuleystay inuu muslimiintii Carbeed kala diriro dhaqamo badan oo xunxun. Balse waxaa jira dhaqamo si weyn bulshada ugu xididaystey, oo Islaamku yareeyey heerkoodii, hase ahaatee uusan ku wada guuleysan inuu xididdada u siibo. Dhaqamada noocaas ahna waxaa ka mid ah qabyaaladda.

Qabyaaladdu waxay ahayd aafo bulshada carabta si weyn u saamaysay oo ay adkayd in ay si buuxda dhaqso uga xoroobaan. Islaamku, inkasta oo uu aad uga digey xumaha qabyaaladda, xafiiltankii joogtada ahaa ee beelaha carbeed u dhexeeyeyna uu hoos u dhigay, haddana si buuxda uguma guulaysan inuu qabyaaladda ka tirtiro laabta bulshada carbeed ee diinta qaadatay[1].

Run ahaantii, Islaamku lama diririn dhaqankii carabta ee abtirsiga ku dhisnaa, balse waxaa la oran karaa wuu sii xoojiyey -ama sida dadka qaarkood u dhigaan wuu ku raacay . Tusaale ahaan, Cumar bin Khadaab waxaa afka loogu tiray inuu sheegay in ay quraanka ku jirtey aayad oranaysa: “ Ha nicina sheegashada aabbayaashiin, waayo taasi waa gaalnimo[2].” Nebigana (SCW) waxaa laga wariyey inuu yiri: “ Ruuxii sheegta aabbe aan dhalin jannada urin maayo, jannadana waxaa laga uriyaa meel toddobaatan sano loo socdo[3].”

In ruuxu inkiro aabbenimada aabbihii dhalay ama uu sheegto aabbe aan ahayn kii dhalay diintu waxay ku sheegtay in ay gaalnimo tahay, sidaa la ogyahayna gaalniadu waa denbiga ugu weyn ee diintu ay sheegtay in qof galo.

Sidaa darteedna, la yaab ma leh in aan aragno shareecada Islaamka oo jideysay in ubadka loogu abtiriyo ninka leh gogosha ay ku dhasheen, xataa haddii la caddayn karo in aabbahaasi uusan dhalin, oo nebiga (SCW) waxaa laga wariyey inuu yiri: “Ilmaha waxaa leh kan gogosha iska leh,

---

1 Waxaa jira aqoonyahanno ku dooday in Islaamku u yimid inuu Carabta dhaqankoodii hore ka xorreeyo, balse dhab ahaantii dhaqankii Carabtu uu Carabta Islaamkii ka xorreeyey.

2 Maxamed Rawaas Qalcat Jii; Mowsuucat fiqhi Cumar bin al-Khadaab (1981, B.636).

3 Musnad al-Imaam Axmed (taxqiiq Axmed Shaakir), xadiiska tirsigiisu yahay 6835.


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

dhillayguna dhagax buu leeyahay[4].” Sidaana Islaamku wuxuu u yeelay si loo ilaaliyo jiritaanka qofka, waayo bulshadii carbeed ee diintu ku soo degtey, ruuxa abtirsigiisa mugdiga la geliyaa wuxuu ka dhignaa sidii ruux aan jirin oo kale, oo ma jirin cid ku dhacdey in ay wax la wadaagto.

Diinta Islaamkuna ciqaab adag aya ka dejisey cambaaraynta abtirsiinyaha, waana ciqaabta loogu yeero “Xad al-Qadf”, oo ka kooban siddeetan jeedal iyo in qofka denbigaas ku dhacaa uu faasiqnimo ku sheegganaado, oo uusan abidkii sharaf yeelan, markhaatina uusan geli karin (Eeg aayadda 4-aad ee Suurat An-Nuur). Sida la dareemi karana ruux aan markhaati gelini waxba ugama duwana ruux dhintay.

Waxaa xusid mudan, in dhaqanka ku abtirsiga aabbuhu uu yahay dhaqan muddo dheer dunida badankeeda ka jirey, diimaha qaarkoodna ay taageereen. Sidaas oo ay tahayse, culumada cilmiga bulshada qaarkood waxay qabaan in dhaqanka ku abtirsiga aabbuhu uu ka tarjumayo awoodda laboodku ku maquuniyeen dheddigga oo keliya. Culumada sayniska ee isir-sidayaasha baaraana waxay caddeeyeen in ilmuhu si isle’eg uga abuurmo labadiisa waalid, oo uu mid walba ka sito 23 hiddo-side (=chromosome). Kaftan aan runta ka fogaynna wuxuu leeyahay: “Aabbenimadu waa sheegasho, hooyanimaduse waa hubaal!”

Wadaaddada Islaamka qaarkood waxay ku andacoodeen in sababta keentay in ilmaha magaca aabbaha loogu abtiriyaa ay tahay in aabbuhu yahay kan lagu waajibiyey masruufa reerka. Waxayna sheegeen in hooyadu xaq u leedahay in ay codsato in laga iibiyo caanaha ay ilmaheeda nuujinayso. Dhab ahaantiise, dooddaasi waa mid damiirka dadnimo- siiba kan hooyonimada-dhaawacaya. Sidee loo aqbali karaa in nuujinta oo saamayn weyn ku leh xiriirka ka dhexeeya hooyada iyo ilmaheeda in nuxur ganacsi la siiyo? Sidee xiriirkii hooyonimo looga dhigay xiriir baayac-mushtar? Taasi soo keeni mayso in ubadku timaaddada hooyadood u sheegaan in adeeggii nuujinta ay horay lacag ugu qaadatay, aysanna jirin wax xuquuq ah oo ay ku leedahay? Halkee looga tagey akhlaaqda diinta iyo damiirkuba fareen ee ubadka ku dhiirrigelinaysa in waaridka, siiba hooyada baari loo noqdo.

Wadaaddadu intii ay doodda sidaa u liidata qiil ka raadin lahaayeen, waxaa loo qaatey- oo diinta iyo dadnimadaba u wanaagsan- in ay ku gaabsadaan in diintu fartay in ilamaha aabbaha loogu abtiriyo, xikmadda arrinkaas ka danbaysana ay Eebbe u daayaan.

Yeelkadeede, marka la isu geeyo heerkii Carabtu qabyaaladda ka joogtey Islaamka ka hor iyo in Islaamku dhiirigeliyey abtirsigu, waxay keeneen in qabyaaladdu noqoto cudur ay adagtahay in maanka carabta laga tirtiro.

Nebigana waxaa laga weriyey inuu yiri: “Afar sifo oo kuwa jaahiliyada ah ummaddaydu ka tegi mayso, dhalasho isugu faan, nasab durid, xiddigo lagu roob-doono iyo meyd u baroorasho[5]”.

[4] Isla isaga, xaddiiska tirsigiisu yahay 1022.


Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved

Sida xaddiiska ka muuqatana afarta walxaad ee nebigu sheegay in aysan ummaddiisu ka tageyn, labo ka mid ahi waxay la xiriiraan qabyaaladda.

Raadka qabyaaladdu marar badan wuxuu ka muuqanayaa saxaabadii nebiga, oo ah kuwii muslimiinta diinta ugu dhawaa. Tusaale ahaan, duullaankii al-Mureysiic (= Banii al-Mustaliq) kadib labo wiil oo ku kala abtirsada Ansaar iyo Muhaajiriin ayaa waxay ku dirireen ceel biyo laga cabbayey, durbadiibana ilaaqdii labada kuray waxay isu rogtey in qabiil la isugu habar wacday, oo waxaa ka dhacday yaa Ansaar aheey iyo yaa Muhaajiriin aheey! Nebiguna markii warku gaarey wuxuu saxaabada ku yiri: " Maxaa keenay habar wacashada Jaahiliyadda… isaga taga waa wax quruntaye / Maa baalu dacwaa al-jaahiliya … dacuuhaa fa'innahaa muntina[6] ". Sidoo kale, afadii nebiga ee Caasho Ina Abuu Bakar (RC) waxaa laga wariyaa in mar ay tilmaamaysey saxaabigii Sacad bin Cubaadaha (RC) ay tiri: " Wuxuu ahaa nin wanaagsan, laakiin waxaa ka qaalib noqday dareenkii qabyaaladda/ Kaana rajulan saalixan walakin ijtahalathu al-xamiyah[7]".

Saxaabigii Abuu Dar al-Gafaari (RC) oo ku sheegnaa Suhdi iyo Alle ka cabsina mar ay ismaandhaafeen nin kale –oo mararka qaarkood lagu sheego inuu ahaa saxaabigii Bilaal- wuxuu ku canbaareeyey hooyadi, oo wuxuu ugu yeeray: "Ina hooyo madoobe". Nebiguna markuu dhacdadaas maqlay waa carooday, Abuu Dar-na wuxuu ku yiri: " Waxaad tahay qof ay jaahiliyadi weheliso[8]".

Ruuxa taariikhda Islaamka waxuun kala socdaana wuxuu si dhib yar ku ogaanayaa in qabyaaladdu ahayd sababta uu eersaday maamulkii curdanka ahaa ee muslimiintu ay samaysteen. Geeridii nebiga (SCW) kadib, iyada oo aan weli nebigii la aasin ayaa bulshadii muslimka durba waxaa saaqday dabayshii qabyaaladda. Saxaabigii Ubaya bin Kacab (RC) oo ka warramaya saxaabadii nebigu wuxuu yiri: " Markaan nebiga la joogney isku meel baan u jeedney (= isku dan baan ahayn), kolkii nebiga la oofsadayse waxaan eegnay xagga iyo xagga (=khilaaf baa lagu kala tagey)". Saxaabiga Anas bin Maalik (RC) isaguna isaga oo tilmaamay xaaladdii muslimiintu ku sugnaayeen saacadihii ka danbeeyey geeridii nebiga (SCW) wuxuu yiri: "markaan ka faraxalanay aaskii nebiga (SCW) waxaan ahayn kuwo qoonsaday qalbigooda[9]" ama wuxuu yiri: "qalbigayaga ayaan nuqsaan ka dareennay".

Welwelka saxaabadu dareemeen dhan wuxuu ahaa mid dabiici ah oo laga fisho ummad kasta oo hoggaamiye ku weyni uu ka baxo. Saxaabada oo rasuulku meekhaan gaar ah u lahaana xaalkoodu kuma sii jiro. Balse, sidoo kale saxaabadu waxay dareemayeen mugdi uga muuqday

---

[5] Saxiix Muslim, 2/644.
[6] Saxiix Muslim, 4/1998, Atarmadi, 5/417, Ibnu Xabbaan 14/544.
[7] Muslim 4/2134, Bukhaari 2/944.
[8] Bukhaari iyo Muslim
[9] Sunan al-Tarmadi, xadiis 3618.


Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved

timaadda sida xaal noqonayo. Waxayna ka walwalsanaayeen cidda buuxin doonta kaalinkii hoggaamiyenimo ee geeridii nebigu(SCW) ay ku bannaysay.

Islaamku markuu yimid carab oo aan waligeed arag awood midaysa ayuu qadiyad midaysa u noqday, qabyaaladdii kala geysay ee ay muddada dheer ku dhaqmayeenna inuu xakameeyo ayuu isku dayey. Hayeeshee, waxaa la oran karaa mabaadidii Islaamku la yimid ma aysan noqon mid disha jeermiskii qabyaaladda, balse waxay ku guuleysatey inay muddo gaaban suuxiso jeermiskaas. Durbadiibana jeermiskaasi wuxuu soo naaxey kolkii uu qarsoomay muuqaalkii nebigu (SCW).

Dhacdada ku caanbaxday magaca "Saqiifa bin Saacida", muslimiintu Muhaajiriin iyo Ansaar ayay xukunkii isugu qabsadeen, oo Ansaartu waxay ku doodeen in loo baahan yahay in xukunka aan lagu faragelin maaddaama iyaga dhulkooda marti loogu yahay. Halka Muhaajiriintu dhankooda uga andacoodeen in xukunka aan iyaga sina lagu dhaafin karin, maadaama ay iyagu yihiin xigaaladii nebiga iyo weliba beel bulshada carabta dhexdeeda magac dheer ku leh, oo carabi taladooda u soo joogsato.

Taasoo jirta, haddana labada qolo mid waliba gudaheeda ayaa khilaaf hoose uga taagnaa. Waayo waa iyada qabyaaladda lagu saawiyo in ay la mid tahay basasha, oo isreebreebkeedu uusan marna dhammaan. Tusaale ahaan, Siyuudi buuggiisa "Taariikh al-Khulafaa" wuxuu ku xusay in markii warkii ku saabsanaa geeridii nebigu uu Maka gaarey, ayaa magaaladii sawaxan iyo buuq is qabsaday. Waxaana hugunkii magaalada maqlay Abuu Quxaafa (= Abuu Bakar Asadiiq aabbihi) oo markaas ahaa oday da' ah.

Abuu Quxaafa dadkii ka ag-dhawaa wuxuu weydiiyey sida wax u jiraan?

Waxaa loo sheegay in la soo sheegay geeridii nebiga (SCW).

Wuxuu yiri: Waa arrin culus, laakiin gadaashiis yaa talada qabtay?

Waxay yiraahdeen: wiilkaaga.

Wuxuu yiri: Oo taa reer Cabdimanaaf iyo reer Muqiiro ma ka raalli noqdeen?

Waxay yiraahdeen: Haa.

Wuxuu ku warceliyey: cid hoos u dhigi kartaa ma jirto wixii aad kor u qaaddo, sidoo kalena cid kor u qaadi kartaa ma jirto wixii aad hoos u dhigto[10].

[10] Asiyuudi, taariikh al-khulafaa. B. 72.


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

waxaana la wariyaa in saxaabo ay ka mid ahaayeen Abuu Sufyaan (RC) iyo Khaalid bin Saciid (RC) ay ka caroodeen in khilaafada loo doortay Abuu Bakar oo ay u arkayeen inuu yahay nin laangaab ah oo aan Qureesh matali karin, waxayna bilaabeen ol'ole ka dhan ah doorashada Abuu Bakar.

Ibnu Taymiya oo ka faalloonaya habdhaqankii Abuu Sufyaan iyo Khaalid bin Saciidna wuxuu yiri: " Abuu Sufyaan jaahiliyaddii Carabta ayaa wax uga harsanaayeen, wuxuuna nacayey in nin aysan isku qabiil ahayni uu dadka u taliyo, wuxuuna jeclaa in xukunka reer Cabdi Manaaf loo dhiibo. Sidoo kale, Khaalid bin Saciid wuu maqnaa, markuu yimidna wuxuu la hadlay Cusmaan iyo Cali oo uu ku yiri: ma waxaad raalli ka noqoteen in talada durriyadda Cabdu-Manaaf gacantooda laga wareejiyo[11]".

Yeelkadeede, Muslimiinta badankooda neef baa ka soo kuddey kadib markii ay ogaadeen in kulankii Saqiifa uu ku dhamaaday in Abuu Bakar Asadiiq (= Cabdullaahi bin Abii Quxaafa) loo doortay madaxnimada muslimiinta. Dhacdadii Saqiifana waxaa lagu tilmaamay in ay ahayd: " mar la arag Eebbe muslimiinta dhibkeedii ka badbaadiyey / إنما كانت بيعة أبي بكر *فلتة وقى الله المسلمين شرها* ".

Hase ahaatee, nafiskii muslimiintu dareemeen markii Abuu Bakar la doortay ma noqon mid lagu sii naalooday, balse dhawr dabshid kadib ayaa wareer iyo walaac kii hore ka culusi la soo darseen, oo arrinku baraka ma leh gaarey. In sidaa wax u dhacaanna waxaa ugu wacnaa muslimiinta oo aan haysan xeer ama dastuur ay ku kala danbeeyaan, damaca iyo danaha la kala matalana lagu xakameeyo.

Tusaale ahaan, shirkii Saqiifa go'aanka qura ee ka soo baxay wuxuu ahaa in madaxnimada muslimiinta loo magacaabo Abuu Bakar oo loo arkayey inuu ahaa nin nebiga aad ugu dhawaa, isla markaana leh dulqaad iyo dabci qabow oo uu dadka ku midayn karo. Shirkaas laguma gorfayn qodobbada aasaaska u ah nidaamka dowladnimada sida; qaabka ay tahay in khaliifka loo doorto -(waxaa xusid mudan in khilaafadu tahay nidaam ay saxaabadu samaysteen geeridii nebiga kadib si ay ugu maareeyaan nolashooda adduunyada, aysanna lahayn qaab go'an balse ay ku xirnayd doonidda bulshada), shuruudaha looga baahan yahay in khaliifka laga helo, waajibaadka saaran iyo awoodaha uu leeyahay, in xil-ka-qaadid lagu samayn karo iyo waddooyinka loo marayo xil-ka-qaadidda haddiiba lagu samayn karo?

Weydiimahaas iyo kuwo kale oo badan saxaabadu iskuma dayin in ay jawaab u helaan. Waayo? weydiimahaasi ma ahayn kuwo markaa ka hor ay ku baraarugi kareen, oo nidaamkii beelaysiga ku qotomey ee Islaamka ka horreeyey loogama baahnayn weydiimaha noocaas ah. Sidoo kale, diinta Islaamku iskuma taxalujin in ay jawaab ka bixiso weydiimahaas, maxaa yeelay

[11] Ibnu Teymiya, Minhaaj As-Sunah, 6/168.


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

dowladnimadu waa baahi adduunyo, oo diintu xal u heliddeeda ay muslimiinta faraha uga qaadday.

Waxaa xusid mudan, in raggii ka qayb-galay shirkii Saqiifa ee Abuu Bakar lagu caloomo-saaray aysan isweydiin su’aalaha la xiriira dowladnimada middii ugu fududayd, oo ah: muxuu ku noolaanayaa khaliifka ama amiirku? Muslimiinta isweydiintaasi markii ugu horreysey waxay ku dhalatay kadib markay arkeen Abuu Bakar oo maalin kadib doorashadiisii u socdo suuqa isaga oo sita alaabo uu ka ganacsan jirey, kuna maarayn jirey noloshiisa iyo tan qoyskiisa. Saacaddaas ayaa saxaabadu ku baraarugeen in si khaliifku kasho ugu helo maaraynta arrimaha loo igmaday, ay lamahuraan tahay in la dammaanad qaado noloshiisa iyo tan qoyskiisa. Markaa kadib ayaana la go’aamiyey in khaliifka mushaar looga qoro khasnadda dowladda, balse durbadiiba waxaa la isweydiiyey su’aal tii hore la xiriirta oo ahayd: mushaar intee le’eg ayay tahay in khaliifka loo qoro?

Saxaabadu arrimaha la xiriira adduunyadooda waxay u wajahayeen hadba sidii ay xal moodaan, ayna ku qancaan in ay ku jirto danta bulshadooda iyada oo laga duulayo duruufaha ku gadaaman meesha iyo waqtiga la joogo. Marka ay sidaa u dhaqmayeenna saxaabadu waxay ka duulayeen xeerka nebigu muslimiinta baray ee oranaya: “Idinkaa ugu xog-ogaalsan umuuraha adduunyadiina[12]”. Hayeeshee, saxaabadu ma ogayn in qarniyo kadib ay imaan doonaan wadaaddo habdhaqanka saxaabada ku sheegi doona inuu yahay sharci Islaam oo muslimiintu meelkasta iyo waqtikasta oo ay joogaanba ay ku dabran yihiin in ay u hoggaansamaan.

Tusaale ahaan, sidaan kor ku xusnay xukunka iyo dowladnimadu waxay ka mid yihiin arrimaha adduunyada. Islaamkuna muslimiinta ayuu u daayey in ay doortaan qaabka ay isu xukumayaan, iyaga oo ka duulaya hadba duruufaha ka jira meesha iyo waqtiga la joogo. Waana tan murtidu tiraahda: “Dadku waqtigooda ayay uga egyihiin aabbayaashood”. Saxaabigii Cabdullaahi bin Mascuud-na (RC) waxaa laga wariyey inuu yiri: “Wixii muslimiintu wanaag u arkaan, Alle agtiisa waa ka wanaagsan yahay.”

Hayeeshii, fuqaho noolaa boqollaal sano saxaabada kadib, ayaa waxay dib-u-akhrin ku sameeyeen fikradihii iyo doodihii saxaabada qaarkood ay duruufo go’an ka qabeen, waxayna kala soo baxeen fikrado ay ku tiinbareeyeen in ay yihiin aragtida shareecada Islaamku ay ka qabto dowladnimada, waxayna ku andacoodeen in ay jawaabo go’an u hayaan weydiimaha ku saabsan xukunka ee aan soo sheegnay in quraanka iyo sunnadu aysan isku shiddeyn jawaab ka bixintooda. Jawaabtii fuqahadaasi bixiyeenna waxay noqotay in ay qurxoontahay in muslimiintu doortaan khaliifka, balse haddii uu seef xukunka kula wareego ay tahay in aan laga hor-imaan ee

[12] Muslim 2363.


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

loo hoggaansamo[13], haddii uu khaldamana loo baahan yahay in loo naseexeeyo laakiin aysan habboonayn in lagu kaco oo lala dagaallamo[14], muddada uu talada haynayaana ay tahay intuu noolyahay oo aan loo baahnayn in xil-kaqaadid lagu sameeyo[15], awoodihiisuna aysan xad lahayn oo dadka iyo dalkaba siduu doono uu ka yeeli karo, la tashi inuu sameeyana uusan ku khasbanayn[16].

Doodda noocaas ah ee maamulka dowladda u muujinaysa sidii inuu yahay arrin diin iyo waxyi la xiriira, waa midda keentay in maanta lagu baaqo in loo baahan yahay in jihaad loo galo sidii dowlad Islaam ah lagu samayn lahaa, isla markaana dimiqoraadiyadda loo muujiyo in ay tahay fikrad sheydaan oo diinta Islaamka ka hor-imaanaysa.

Dhab ahaantiise, dooddaasi waa mid xaqiiqada dabamarsan. Sabab? Dimiqoraadiyaddu waa ka hormarsan tahay khilaafada[17], oo nidaamkii halka qof maamulayey waxay ka dhigtay mid hey'ado xilkoodu qaybsan yahay ay maamulaan. Shakina kuma jiro in saxaabadii rasuulku haddii ay maanta noolaan lahaayeen aysan u baroorteen nidaamkii khilaafada. Caqabadaha waaweyn ee ka hor-imaanaya duulka u ol'oleeya dowladda diiniga ahna waxaa ka mid ah sida laga yeelayo fikradda sheegaysa in dumarka iyo dadka aan muslimka ahayn labaduba aysan qaban karin talada waddanka?

Waxba yaan hadalku nala taraarixine aan dib ugu noqonno mawduuca, hoostana ka xarriiqno in qabyaaladdii Islaamku isku dayey inuu muslimiinta kala diriro ay dib muslimiinta dhexdooda

---

[13] Waxay dejiyeen qaacido oranaysa: "Kii itaalkiisu bato, adeeciddiisa ayaa waajibta/ Man ishtadat wat'atuhu, wajabat dhaacatuhu".

[14] Tusaale ahaan, al-Imaam Annawawi wuxuu leeyahay: " Muslimiinta oo dhammi waxay isku raaceen in ku kiciddooda iyo la dagaallankoodu uu xaaraan yahay, hadday doonaan faasiqiin daalimiin ah ha ahaadeene, … ahlu sunnaduna waxay isku raaceen in suldaanka aan faasiqnimo darteed loo casilayn." (Eeg. Sharxi Annawawi Calaa Saxiix al-Muslim 12/229). Dhab ahaantiise, isku raacidda Imaamku sheegay waa mid aan wax ka jirin, waayo culumo badan ayaa qaba in lagu kici karo.

[15] Inta uusan dhimanna wuxuu xaq u leeyahay inuu wiilashiisa xukunka ku wareejiyo, xataa haddii aysan weli qaangaarin. (waxaa jirta in buug laga qoray madaxdii muslimiinta ee xukunka ku wareejiyey carruurtooda aan qaangaarin).

[16] Waxaa la isweydiiyey su'aasha ah: talada la tashiga ka dhalata qaadashadeedu ma khasabbaa mise waa istikhyaar (= Hal ashuuraa mulsama am maclama?).

[17] Taasina la yaab ma leh, waayo aadamiga waayahaa waxbara, dimoqoraadiyadduna waxay ka tarjumeysaa kufaa-kacii aadamigu muddada dheer samaynayey, welina sameeyo. Dimoqoraadiyaddu waxay leedahay aalado lagu xakameeyo khaladaadka sida; baarlamaan, dastuur, xisbiyo mucaarad ah iyo saxaafad madax bannaan. Sidaas oo ay tahay dimoqoraadiyaddu ma aha nidaam dhamaystiran, oo aan cillad lahayn, oo xaaladda dimoqoraadiyadda waxaa si fiican uga tarjumaysa oraahdii mudane Winston Churchill ee ahayd: "Dimoqoraadiyaddu waa nidaamyada xukunka kan ugu liita, marka laga reebo wixii ka soo hara oo dhan."


Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved

ugu xoogeysatey wixii ka danbeeyey markii xilka khilaafada loo dhiibey khaliifkii Cusmaan bin Cafaan (RC)[18].

Dhigaallada taariikhda Islaamka qaarkood waxay wariyeen in markii Cusmaan loo magacaabay xilka khilaafada uu u soo galay Abuu Sufyaan uuna ku yiri: " waxay kuu soo meertay (=madaxnimadu) Teym iyo Caddi[19] gadaashood, ee inta sida banooniga u wareejisid, Banii Ummaya tiirar uga dhig, waayo waa boqortooyo, janno iyo naar waxay yihiin garan maayee." Cusmaan inta xanaaqay ayuu ugu warceliyey: " "Iga tag, Alle sidaa iyo sidaa ha ku yeelee![20]"

Shaki kuma jiro in qaybta danbe ee hadalka Abuu Sufyaan uu yahay mid Cusmaan iyo muslimiinta oo dhammi ay si weyn uga caroonayaan. Taasoo jirta, haddana waxaa la rumaysan yahay in talada qaybteeda hore ee ku saabsan soo dhaweynta tolka uusan Cusmaan wax didmo ah ka qabin. Muddadii uu talada hayey, qabyaaladdu aad bay u sii xoogeysatey, ugu danbayntiina qudhiisii bay galaafatay[21]. Dhab ahaantiina, muslimiintii carbeed qabyaaladdii dhaqanka u ahayd waxay ku daarteen ummadihii kale ee ku noolaa deegaannadii Islaamku gaarey.

Tusaale ahaan, in badan oo ka mid ah muslimiintii aan carabta ahayni, kolkiii ay arkeen in carabta laga faddilo muslimiinta kale, ayay waxay bilaabeen in ay qabaa'ilka carabta middood sheegtaan[22]. Sidaa darteedna, waxaan arkaynaa qaar ka mid ah culumada Islaamka oo lagu tilmaamayo inuu qolo hebla u dhashay, balse uu bahwadaag la' ahaa ama sheegan jirey qabiil hebel (=qabiil Carbeed). Sida la ogyahayna taniyo markii ay dhalatay dowladdii Ummawidu, waxaa la bilaabay in muslimiinta loo qaybiyo Carab iyo Mawaali (=Cajam) kala xuquuq iyo waajibaad ah. Waxaana la allifey xaddiis oranaya: "Salaadda saddex un baa jabiya: ey, dameer iyo mowle[23]." Habdhaqankaasina wuxuu sabab u noqday in dunida Islaamku uu ka curto dhaqdhaqaaqii shucuubiyadda, ee ka dhanka ahaa Carabta iyo carabiyeynta.

---

[18] Waxaa la rumaysan yahay in Abuu Bakar muddadii uu xilka hayey uu ku guulaystey inuu dowlad dhiso, sidoo kalena Cumar uu ku guuleystay inuu imbiradooriyad dhiso, laakiin kolkii Cusmaan talada qabtay muslimiintu dhexdooda ayay isaga mashquuleen. Taana waxaa loo aaneeyaa, hantidii faraha badnayd ee muslimiintu ka heleen dhulalkii ay furteen iyo habacsanaan ka jirtey xagga maamulka.

[19] Waa labada beelood ee ay ka kala dhasheen Abuu Bakar iyo Cumar.

[20] Ibnu Cabdu al-Bar, al-Istiicaab; 4/87. Waxay kaloo wariyeen in Abuu Sufyaan tolkiis ku yiri: " War Banii Ummayow u qabsada sida banooniga, kan Abuu Sufyaan ku dhaartaan ku dhaartaye kama suulin in aan idinla doonayey, kuraydiinaana kala dhaxli doona."

[21] Khilaafkii iyo colaaddii maalintaas Muslimiinta dhexdooda ka aloosmay weli saamayn weyn bay muslimiinta ku leeyihiin. Waayo? Muslimiintu dhacdooyinkaas taariikheed taariikh ahaan uma akhrin, balse caqiido iyo diin ahaan bay u akhriyeen.

[22] Akhristow ma istiri taasi waa sababta keentay in Soomaalidu odayaasha carabta lagu sheego ee ay ku abtirsadaan ay badaha gadaashooda uga soo dhoofsadaan.

[23] Maxamed Nabiih Xijaab; Madaahir al-Shucuubiyah, B.51, wuxuu ka soo xiganayaa Ibnu Cabdu Raboh, al-Ciqdi al-Fariid. Waxaa xusid mudan in xadiiskaan markii hore loo dhigay sidii in nebigu uu yiri: " salaadda waxaa gooya



**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

Si kastaba ha ahaatee, qabiilka waxaa loo sawiraa sidii inuu yahay cudur lagu khasban yahay in lala noolaado, oo aan sina dhaqanka bulshada looga tirtiri karin. Balse si taa ka duwan cilmiga bulshadu wuxuu noo sheegayaa in beelaysigu yahay dhaqan aadamiga badankiisu yaqiin[24], welina bulshooyin badan ku sii harsan, sidaas oo ay tahayna uu  yahay nidaam xilli leh oo bulshooyinka dunidu qolaba maalin ka gudubto, kadib marka ay isbeddelaan duruufaha dhaqan-dhaqaale ee ay ku noolyihiin. Bulsho kastaana ay leedahay xilli ay ka gudbayso qabiilka, oo ay u gudbayso marxalad qarrannimo oo ruux kastaa uu qof ahaantiis u taagnaan karo, kuna qiimaysan yahay wuxuu galo iyo wuxuu gudo oo qura. Halkudhegga bulshada oo dhammina uu noqdo midkii Abwaan Gaariye (AUN) ee ahaa:

Uf qabiilka anaa leh
wuxuunbaa ku adeegta
nin iskii kartidiisa
isagoon cid ku tiirsan
isku taagi kareynin
una haysta ateero
ayaantuu dambi geysto
laga hoos galo eeda!

Isku soo wada duuboo, qabiilka iyo qabyaaladdu waa qori dab ahi iyo qaaciis aan sina loo kala reebi karin. Ku dhaqanka qabyaaladdana laguma joojin karo wacdi wadaad iyo wareegto dowladeed toona, balse waxaa lagu joojin karaa oo keliya in baahidii dhaqan-dhaqaale ee markii hore keentay ay meesha ka baxdo, qofkuna dareemo in qabiilku uusan waxtar u lahayn nolashiisa. Arrinkaas oo isaguna kolkiisa keenaya in qiyamka qofka iyo bulshaduba isbeddelaan. Waana xaqiiqo biyo kama dhibcaan ah in qiyamka qofka iyo tan bulshaduba isla dhalanrogaan hadba waqtiga iyo meesha la joogo. Waxa qabiilka lagu beddelan karaana waa dowladnimo. Si dowladnimada loogu qancana waa in bulshada, siiba da' yarta dhexdeeda lagu baahiyaa fikradda muwaadinnimada,  taasoo iyana kolkeeda  u baahan in qofka iyo bulshaduba miraha dowladnimada nolashooda ka dareemaan, oo waatan murtidu noo sheegaysa in "meel hoo u baahan aan hadal wax ka tarin".

Cabdisaciid Cadi Ismaaciil
Email:Sismail42@gmail.com

eyga madow, dameerka iyo dumarka." Su'aasha u baahan in la isweydiiyaana waxay tahay: midabka eyga iyo sheydaanka maxaa iska galay? Soo midabtakoor meesha kama muuqdo?.

[24] Bulshooyinka badankooda marxaladda qabiil ka guurku waxay u bilaabtay wixii ka danbeeyey qarnigii 18-aad, kadib markii ay xoogaysatay fikradda dowlad-qarameedku (=Nation-State).


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**